Kusoo dhawoow Dugsiga Xanaanada

Waa lajoogaa waqtigii!

Cunugaagu wuxuu bilaabayaa dugsiga xanaanada. Xili kamid ah astaamaha nolosha iyo waqti farxad u leh adiga iyo cunugaaga. Waxaa laga yabaa inaad qabto suaalo dhowr ah. Fadlan waxaad la hadli kartaa markaad rabto mid kamid ah shaqaalaheena dugsiga xanaanada haday jiraan wax aad rabto in laguu sharxo.

Waxaan halkaan ujoognaa inaan xaqiijino in cunugaagu waqti amaan ah ku qaato dugsiga xanaanada, lehna waxbarasho xiiso leh.

Waxaan rajaynayaa in adigga iyo cunugaagu ku faraxsanaan doontaan inaad nagusoo biirtaan.
– Kusoo dhawoow Dugsiga Xanaanada ee magaalada Borås!

Ku darid

Ku darista carruurta dugsiga xanaanada waxaa loomaraa wada tashi lalayeesho waalidiinta/masuuliyiinta waxaana lagu saleeyaa baahiyaha cunugaaga. Mudada cunuga dugsiga lagu daraayo waxay qaadan kartaa mudo dhan 3 ilaa 14 maalmood.

Qoraalka higsiga dugsiga

Dhamaan shaqada dugsiga xanaanada waxay kudhisantahay manhajka dugsiyada xanaanada. Dugsiga xanaanadu wuxuu ugogol xaarayaa waxbarashada mustaqbalka fog ee curuurta. Hawlaha dugsiga xanaanadu waa kuwo farxad leh, amaan ah oo waxbarasho lagu siinaayo dhamaan carruurta dugsiga dhigata. Dugsiga xanaanadu wuxuu siinayaa carruurta adeegyada barbaarinta caruurto oo wanaagsan kaasoo iskugu jira daryeel, korin iyo waxbarida carruurta . Waajibaadka dugsiga xanaanadu waa in laxaqiijiyo in cunug kasta uuhelo fursad uu hormar kusameeyo ayadoo laga fiirinaayo baahiyihiisa gaarka ah. Arintaan waxaa looga guulgaarayaa ayadoo lakaashanaayo waalidiinta/masuuliyiinta cunuga.

Ciyaartu waa qeyb muuhim u ah hormarka iyo waxbarashada cunuga. Marka joogo dugsiga xanaanada, ciyaarta waxaa si ujeedo leh loogu adeegsadaa kobcinta hormarka iyo waxbarashada curuurta.

Saacadaha dusgigu furanyahay iyo jadwalada

Saacadaha uu dugsiga xanaanadu furanyahay waxaa lagu qabtaa baahiyaha daryeelka maalintii ee carruurta . Saacadaha dugsigu furanyahay iyo saacadaha shaqaaluhu shaqeeyaan waxaa lagu jaangooyaa jadwalada carruurta . Haddii lagusoo wargaliso jadwalka cunugaagu ku imaanaayo dugsiga labo asbuuc kahor intaan isbadalka ladhaqan galin, waxaa kuubalan qaadaynaa insaacadaha dugsiga xanaanadu furanyahay lagu salaynaayo baahiyahaaga. Isbedelada jadwalka waxaa laga dalban karaa adeegga onlineka kushaqeeya ee dugsiyada xanaanada iyo xarumaha iskuulka kadib oo laga helaayo boras.se/sjalvservice

Waqtiyada cunugu dugsiga xaadiraayo waxaa lagu aadinayaa saacadaha shaqada/waxbarashada ee waalidiinta/masuuliyiinta. Haddii shaqo raadis tahay ama aad shaqo saacado kooban ah aado,

cunugaagu wuxuu dugsiga xanaanada joogi karaa 15 saacadood asbuucii. Haddii u baahantahay adeegga daryeelka carruurta ka hor 05:30 subaxnimo ama kadib markay saacadu gaarto 18:30 galabnimo,xiliyada fiidkii iyo/ama maalmaha dhamaadka asbuuca, waxaad dalban kartaa dugsiga xanaada ee 24/7 carruurta lagu hayo.

Maalmaha qorshaynta ee macalinka/ shaqaalaha dugsiga

Shan maalmood ayaa sanad kasta looqoondeeyaa in lagu dajiyo qorshaha ururka, tababarada adeeg bixinta iyo hawlo lamid ah kuwaasoo loo sameeyo macalimiinta iyo shaqaalaha dugsiga xanaanada. Haddii cunugaagu daryeel ubaahdo maalmahaas, dugsi kale oo xanaanada ah ayaa si kumeelgaar ah loogayn karaa. Hadii aad u baahatid xanaanada caruurta maalmahaas waxuu ilmahaagu boos ka heli karaa xanaanada joogtada/heeganka ah (Jourhavande förskola).

Maalmaha fasaxa

Dugsiga xanaanada ee xiliga xagaaga wuxuu furnaanayaa afar asbuuc oo xiliga xagaaga kamid ah. Hadaadan shaqada fasax kaqaadan mudadaan, cunugaaga waxaad gayn kartaa dugsiga xanaanada ee xiliga xagaaga. Macluumaad dheeri ah oo kusaabsan xiliga cunugaaga lagaynaayo xarunta daryeelka carruurta , sida marka waalidku shaqo aado, xiliyada fasaxa ama aad shaqo la'aanta tahay, fadlan la xiriir ”Regler och villkor i förskolan” oo laga helo boras.se/forskola

Qarashaadka

Qarashka dugsiga xanaanada uu kaqaadaayo cunugaaga waxaa lagu salaynayaa dhaqaalaha aad haysato iyo mudada cunugu joogo dugsiga. Meelaynta carruurta waxaa lasameeyaa 12 bilood sanad kasta ayadoo laraacaayo jadwalka joogtada ah ee cunugaaga. Waxaad macluumaadka dhaqaalahaaga iyo jadwalka cunugaaga kusoo gubin kartaa adeegga onlineka ah ee dugsiga xanaanada iyo xarumaha xanaanada ee iskuulka kadib oo ciwaankiisu yahay boras.se/sjalvservice Wixii kusaabsan shuruucda qarashaadka dugsiga, fadlan booqo bogga boras.se/forskola

Keenista iyo qaadista cunuga

- Xiliyada lakeenaayo iyo marka laqaadaayo cunuga waa in lagu

dabaqaa jadwalka lagu siiyay. Waa muhiim inaad la xariirto xubin kamid ah shaqaalaha markasta oo aad keento ama qaado cunugaaga.

- Waa qasab inaad u sheegto dugsiga xanaanada hadii qofkale dugsiga kasoo qaadaayo cunugaaga.
- U sheeg dugsiga xanaanada wixii isbadalo aan joogto ahayn oo kuyimaada jadwalada cunuga.
- Mar kasta usheeg dugsiga xanaanada hadii cunugaagu maqnaan doono iyo xiliga uu dugsiga kusoo laabanaayo.
- Haddii qof ehel ah oo dhalinyaro ah uu cunugaaga kasoo wadaayo dugsiga xanaanada, foomka ogolaanshaha waa in labuuxshaa uuna dugsiga udiraa waalidka/masuuliyiinta cunuga.

Xasuusnoow!

- Mar kasta waa inaad sheegtaa macluumaadka meesha sida aan kugu heli karno marka cunugaagu dugsiga xanaanada joogo.
- Banaanka ayaan ubaxnaa nooc kasta oo cimiladu tahayba. Carruurta waa in laga badalaa dharka iyo sidoo kale kabaha buudka ah iyo dharka roobka laga xidho. Fadlan akhri talooyinkeena ku qoran bogaa 14.
- Waa muhiim in dharka cunugaaga magaciisu kuqoranyahay.
- Ka ilaali cunuga maryaha leh xargaha/suumanka iyo koofiyadaha madaxa ee aan lasiibi karin, maadaama maryahaasi ay kudhagi karaan qalabka carruurtu kuciyaarto.

Cuntada iyo xiliga carruurtu wax cunayaan

Sadex jeer ayaa cunto lasiiyaa carruurta maalintii: quraac, qado, iyo cuntooyin fudud oo galabkii lasiiyo. Dookhyadeena cuntadu waxay kobcinaysaa nafaqooyinka kaladuwan. Waxay udiyaarsan tahay inay daboosho 75% nafaqooyinka cunugu ubaahanyahay, haday cunaan dhamaan sadexda waqti cunto. Biyo iyo caano nadiif ah ayaa lasiiyaa xiliga qadada. Cuntooyin gaar ah ayaa lasiiyaa carruurta ubaahan nafaqooyin gaar ah. Sababo laxariira xasaasiyaad jira, dhamaan dugsiyada xanaanada cuntadooda laws kuma jiro. Dhamaan dugsiga xanaanada ee kuyaala magaalada Borås waxay shahaado kahaystaan KRAV. Tani waxay kadhigantahay ugu yaraan 25% kamid ah cuntada carruurta lasiiyo waa mid nadiif ah jikooyinka magataan cuntooyinka labacrimiyay (GMO) ama halista keeni kara, kaluunka gaduudan. Jikooyinka waxay sidoo kale kudadaalaan inay kariyaan cuntooyin kasamaysan maadooyinka nadifta ah.

Markuu cunugu jirado

Waxaa jira fayruusyo iyo bakteeriyo badan oo nagu dhaca. Carruurta yaryar waxay sigaar ah ugu nugulyihiin xanuunadaan waayo nidaamyadooda difaaca jirkoodu wali sifiican uma kobcin. Dugsiga xanaanada wuxuu dajiyaya talooyin kayimaada HYFS (Hygiensjuksköterska i förskolan – kalkaalisada caafimaadka ee dugsiyada xanaanada) markay timaado arimaha laxariira nadaafada iyo talooyinka dhanka xanuunada. Haddii guriga joogto oo aad daryeelayso cunug jiran, cunuga walaalkiis ah ee caafimaadka qaba ayaa kubiiri kara dugsiga xanaanada. Haddii shuban dikaaco (calool xanuun), dugsiga xanaanadu wuxuu kudadaalayaa xakamaynta faafida infakshanka ayagoo amraaya in carruurta walaalahood xanuunku kudhaco ay guriga joogaan sidoo kale.

Tilmaamaha laxariira xiliga ay tahay in carruurtu guriga joogaan

- Marka cunugaagu qandhado, waxaa lagaa doonayaa inaad cunuga guriga kuhayso ilaa qandhadu kaba'do aysana kusoo noqon mudo 24 saacadood ah.
- Marka cunugaaga qandhadu kaba'do si kama danbays ah laakiin uu aad udaalanyahay ama tabar daro hayso taasoo udiidaysa inuu cunugu sameeyo hawlaha caadiga ah ee dugsiga xanaanada.
- Marka cunugaagu uu qabo xanuun laysqaadsiiyo, sida qumanka ama canbaarta, kaasoo aan ladaawayn ama daawooyinka loo bilaabay wax kayar labo asbuuc.
- Calool xanuunka leh mataga iyo/ama shubanka. Cunugaagu wuxuu kulaaban karaa dugsiga xanaanada markuu si caadi ah cuntada ucunaayo uusana matag ama shuban lahayn ugu yaraan mudo 48 saacadood ah.

Xasaasiyaadka

Xasaasiyaadka jira awgod, laws gabi ahaanba waa laga xarimay dugsiga xanaanada. Sidoo kale iska ilaali baraafuunada iyo waxyaabaha carafta badan maadaama shaqaalaha ama carruurtu xasaasiyad kuqabi karaan.

Xafaayadaha carruurta iyo alaabta raaxada

Waalidiinta/masuuliyiinta waxaa laga doonayaa inay xafaayado ukeenaan caruurtooda intay kujiraan dugsiga xanaanada, iyo sidoo kale boolbayaasha xanaanaynta, bustayaal, tuunjiyo iyo waxyaabaha

lamidka ah. Si aad uhesho macluumaad dheeri ah oo kusaabsan carruurta iyo xanuunada, booqo vgregion.se/hyfs ama akhri buugga macluumaadka ee ciwaankiisu yahay "När ditt barn blir sjukt", kaasoo aad kaheli karto dugsiga xanaanada.

Lashaqaynta waalidiinta/masuuliyiinta

Waxaan kudadaalaynaa inaan wada shaqayn dhaw kadhex abuurno waalidiinta/masuuliyiinta iyo dugsiyada xanaanada. Wada shaqayntaan waxay yeelan kartaa noocyo kaladuwan iyo ujeedooyin kaladuwan si lookordhiyo saamaynta iyo gacanta ay waalidiinta/masuuliyiintu kuleeyihiin hawlaha dugsiga xanaanada. Snadka oo dhan, waxaa lagugu marti qaadayaa inaad kaqayb gasho wada xaajoodyada kusaabsan hormarinta cunugaaga, waxaadna codsan kartaa kulano dheeri ah haday muhiim tahay. La xariirda maalinkasta aad laxarirto shaqaalaha markaad keenayso iyo markaad qaadayso cunugaaga waa fursad wanaagsan oo aad ku hubin karto xaalada cunugaaga iyo sida uu maalintaas ku ahaa dugsiga.

Haddii qabto wax soojeedin ama fikrado ah oo ku aadan dugsiga xanaanada, fadlan hakadaahin inaad lahadasho xubin kamid ah shaqaalaha dugsiga. Waxaad sidoo kale la xiriir kartaa maamulaha dugsiga xanaanada ama waxaad soojeedanada iyo fikradahaaga ugudbin kartaa Maamulka Waxbarashada Dugsiyada xanaada ee magaalada Borås adoo usii marinaaya boras.se/forskola

Halmar sanadkiiba, dhamaan waalidiinta/masuuliyiinta carruurta waxaa lagu casuumaa inay kaqaybgalaan sahan, loo isticmaalo in lagu go'aansho sida waalidiintu/masuuliyiinta carruurtu u arkaan ururka dugsiga xanaada iyo in lagu go'aansho in carruurtu faraxsanyihiin iyo inkale. Sahanka Cimilada Dugsiga xanaada ayaa door muhiim ah kaciyaara hormarinta ururkeena, waxaana kudhiiri galinaynaa dhamaan waalidiinta/masuuliyiinta carurta inay waqti kubixiyaan oo ay kajawaabaan sahanka.

Barnhälsa (Xaafimaad Carruurta)

Dugsiyada xanaada ee kuyaala magaalada Borås waxay awoodaan adeegsiga kooxda Barnhälsa oo ah macalimiinta waxbarashada gaarka ah iyo dhakhaatiirta cilmi nafsiga. Waxaa kushaqeeyaan awood firfircon oo kahortag leh waxayna dhaqan galiyaan talaabooyin loogu talagalay carruurta shaqsiyaad ahaan, kooxo ahaan iyo ilaa heer urur. Barnhälsa waxay lashaqayaan Xarunta Barashada Luuqadaha badan

(CFL), Xarunta Carruurta iyo Dhalinta ee IFO, xarumaha caafimaad carruurta (BVC) iyo xarumaha caafimaad qoyska.

Wargalinta waajibka ah

Shaqaalaha dugsiga xanaada wuxuu sharci kadoonayaa inay soosheegaan shakiyada ku aadan suuragalnimada in cunugu halis kujiro dhinacyada xadgudubka ama dayacaada, tusaale. Shaqaalaha dugsiga xanaada waxaa sidoo kale laga doonayaa inay faafiyaan macluumaadka laxariiri kara baaritaanada ay samaynayaan laamaha adeegyada bulshada.

Masuuliyada qarinta macluumaadka

Dhamaan shaqaalaha dugsiga xanaanada kashaqeeya waxaa waajib ku ah qarinta macluumaadka sirta ah. Marka koobaad ee ay shaqada bilaabaan, shaqaalaha dhan waxaa lagadonayaa inay saxiixaan waafiqidooda nidaamka qarinta sirta dadka. Arintaani waxay qusaysaa macalimiinta isbadbadala iyo kuwa shaqo baradka ah.

Caymiska

Carruurta waxay caymis laga siiyaa shilalka ay galaan intay dugsiga usiisocdaan ama kasoo socdaan iyo markay dugsiga joogaanba. Caymisku wuxuu sidoo daboolayaa safarada ay banaanka iskuulka ku aadaan. Haddii shil dhaco, waa waajibaadka waalidiinta/masuuliyiinta cunuga inay dhaawaca kuwargaliyaan shirkada caymiska. Wixii macluumaad dheeri ah iyo meelaha lagala xariiraayo waxaad kaheli kartaa boras.se oo ciwaankiisu yahay Utbildning och förskola menu.

Meelaha lagala xariiraayo waalidiinta/ masuuliyiinta carruurta

Waa muhiim in dugsiga xanaanadu uu markasta haysto xariirada rasmiga ah ee waalidiinta/masuuliyiinta carruurta hadii xaalad dedgeg ah timaado. Gudbi ama cusboonaysii macluumaadka lagaalasoo xariiraayo adoo adeegsanaaya adeegga onlineka ah ee boras.se/sjalvservice

Joojinta meelaynta cunuga

Haddii cunugu joojiyo imaanshaha dugsiga xanaanada, waxaa jira mudo lagu joojinaayo imaan shihiisa dugsiga oo 30 maalmood ah. Iskadiiwaangali dalabka kajoojinta cunuga dugsiga adoo ugu gudbinaaya Maamulka Waxbarashada Xnaanada carruurta adeegga

onlineka ee boras.se/sjalvservice Sidoo kale usheeg go'aankaaga dugsiga xanaada iyo/ama maamulaha dugsiga.

Ping Pong

Barnaamijka waxbarasho Ping Pong wuxuu kuusahlayaa inaad lasocoto hormarka iyo waxbarashada cunugaaga. Ping Pong waa bog casri ah oo dugsiga xanaanadu u aruuriyo sawirada, waraaqaha bilkasta iyo macluumaadka kale ee muhiimka u ah waalidiinta/masuuliyiinta. Wax badan ka ogoow barnaamijka Ping Pong kana samayso ciwaan adoo kalayaa bogga boras.se/sjalvservice

Adeegga Shaqsiga ah

Waxaad kagali kartaa adeegyada onlineka ah ee Magaalada Borås bogga boras.se/sjalvservice
Adeegyada onlineka ah waxay kuusahlayaan, tusaale:

- Inaad codsato ama iskajoojiso gaynta cunugaaga dugsi xanaano
- Inaad isbadalo kusamayso jadwalka cunugaaga
- Aad cusboonaysiiso macluumaadka lagaalasoo xariiraayo
- Inaad gudbiso macluumaadka awoodaada dhaqaale
- Gal adeegga Ping Pong

Intaad isticmaalayso adeegyada onlineka ah, waxaad helaysaa jawaabo degdeg ah oo u=ku aadan suaalahaaga, waxaad si fiican uga boggan kartaan macluumaadka aad bixisay, dugsiga xanaanaduna wuxuu heli karaa maclumaadkii ugu danbeeyay.

Sawirada

Kaliya shaqaalaha dugsiga ayaa xaq uleh inay sawiro/muuqaalo kaduubaan hawlo maalmeedka dugsiga xanaada, waxay kuduubi karaa kaliyo ujeedo laxariirta in hormarka iyo waxbarashada carruurta lagu gudbiyo adeegga onlineka ah ee Ping Pong.
Sawirada ay qaadaan sawir qaadayaasha madaxa banaan ama waalidiinta/masuuliyiinta cunugu maaha kuwo la ogolyahay. Haddii warbaahintu dugsiga soobooqato, waalidiintu waa inay bixiyaan ogolaanshaha ku aadan in sawiro laga qaado caruurtooda lana faafiyo.

Dharka dhamaan cimilooyinka

Halkaan waxaa kuqoran dhawr tilmaamood oo kusaabsan waxyaabaha cunugaagu ubaahanyahay markuu dugsiga xanaanada joogo.

XILIGA XAGAAGA

Koofiyada qoraxda
Funaanad qafiif ah oo gacmo dheere ah iyo surwaalo qafiif ah.
Muraayadaha qoraxda

XILIGA GU'GA/DAYRTA

Koofiyad qafiif ah
Galoofyada gacmaha
Surwaalaha jilicsan/surwaalada lasiibo
Jaakad
Funaanad dhaxameed culus
Sigaanta buudka
Muraayadaha qoraxda

XILIGA DIRAACDA

Galoofyada qafiifka ah, 2 xabo
Sigaanta buudka
Jiilaalka oodhan
Funaanad dhaxameed culus
Koofiyad culus

Maryo dheeraad ah

- Dharka roobka (dunta ah) xiliga dayrta iyo gu'ga
- Buudka cinjirka ah (dunta ah) xiliga dayrta iyo gu'ga
- Sigaanta, labo xabo
- Buumo, sadex xabo (hadii uusan cunugu isticmaalin xaayado)
- Surwaalada guriga lagu joogo, labo xabo
- Funaanad dhaxameed
- Labo Funaanadood

Sabo amaan awgood, waxaan kugula talinaynaa inaadan dharka kuridin m=bacaha balaastiga ah!

Madoonaysaa inaad wax badan ogaato?

Waxaad waydiin kartaa shaqaalaha ama maamulaha dugsiga xanaanada. Bogga boras.se/forskola waxaad ka helaysaa macluumaad dheeri ah iyo Su'aalaha marwalba la is weydiyo. Hawlaha farsamo qaar badan oo kamid ah waxaa looga boggan karaa adeegyada onlineka ah ee laga helo boras.se/forskola iyo boras.se/sjalvservice. Hadaadan haysan ID Bangi ama aqoonsi elektaroonig ah, fadlan la xiriir iskuduwaha dugsiga xanaanada. Maclumaadka aad kalaxariirayso waxaad kahelaysaa bogga boras.se/forskola ama bogga macluumaadka ee magaalada Borås.

BORÅS STAD

MAAMULKA WAXBARASHADA
XANAANADA CARRUURTA
Booqo xaruntooda oo ku taala
Olovsholmsgatan 32
Lambarka taleefanka. 033 35 70 00
Websaydka boras.se/forskola

Sawirka Scandinav, Matton Naqshada Anne Brink Waxaa daabacay Kommuntryckeriet 2018